WORLD BANK GROUP

Warqadaqooneed Shaqo

Fahmidda Badeecooyinka Muhiimka ah, Iskuxirrada iyo Horumarinta Waxsoosaarka Warshadeed ee Afrika: Dejinta Qorshe Fikradeed

By Mike Morris & Masuma Farooki
PRISM, University of Cape Town

“Aqoon Kobcin ku Saabsan Maamulka Khayraadka Shidhaalka”

1. Hordhac

Xoojinta waaxda dhaqaale ee waxsoosaarka warshadeed waxay lafdhabar u tahay taabbagelinta qorshe horumarineed, maadaama uu xiriir dhow ka dhexeeyo dakhliyada, shaqaalaynta iyo warshadaynta. Guusha ay gaareen dalalka Aasiya ee dhaqaalahoodu kobcayo salkana ku haysa iyada oo ay ballaadhiyeen waaxahooda dhaqaale ee waxsoosaarka warshadeed, dakhliyada oo ay kor u qaadeen iyo in ay baxnaaniyeen heerarka kobcineed ee dhaqaalahooda labaatankii sannadood ee la soo dhaafay, waxaa laga dheehan karaa faa'iidooynka laga dhaxli karo qorshahaa horumarineed. Ha se yeeshee, caqabad murugsan ayaa hor taagan dalal badan oo dhaqaalahoodu soo korayo, taa oo ah sidii ay u dhaqangelin lahaayeen qorshe warshadayn oo la jaanqaada waaga casriga ah. In warshadayn lagaga maarmo dibedda oo wax laga la soo degaa xilligan la joogo ma qabato kaliya e qorshe dhoofin dardar leh ayaa loo door bidaa dalalka ku cusub warshadaynta, maxaa yeelay Shiinaha iyo dalalka kale ee ku guuleystaty dhoofinta ee Aasiya ayaa ku liibaanay qorshahaa. Suuqyada caalamiga ee dalalka warshadaha leh ka dhexeeyaa waagan la joogo aad ayaa tartanka loogu jiraa u adagyahay, taa oo dalka ku cusub kaliya aanay ku adkaanayn uun e ay u dheertahay in ay la tartamaan alaabada suuqyadooda gudaha dibedda uga imanaysa. Arrintani waxay keenaysaa in la is wayddiiyo in uu jiri karo qorshe dhaqaale khayraad dabiici ah ku tiirsan oo ay Afrika yeelato, kaa oo ku dhisan qaninimada badeeco ee qaaraddu leedahay.

Muddadii u dhexaysay 2003 ilaa 2011 dalalka badeecooyinka muhiimka dhoofiyaa waxay si wayn uga faa'iideen qiimaha si isa soo taraysa kor ugu kacayay ee bedeecooyinkooda ay dhoofiyaan laga siisanayay.

Ha se yeeshee, ku tiirsanaanta dakhli ka soo xerooda khyaraadkaa uun halisaheeda ayay leedahay, maadaama raasamaalka qaaliga ah ee gala badeecooyinka muhiimka ah badankood uu xaddido shaqaalaynta iyo fidinta ka faa'iidaysiga dakhliyadaa. Taa waxaa u dheer, sicirka badeecooyinka oo hoos u dhacay labadii sannadood ee la soo dhaafay iyo hoosudhaca ka dhashay heerarka koboca GDP ayaa waxay sii xoojiyeen in dhaqaale iskudhaf ah uu ka cuddoonyahay kagana adkaysi badanyahay carqaladaha ku yimaada dhaqaalaha halillaha ah, gaar ahaan waaxda badeecooyinka muhiimka oo in muddo ah ay soo foodsaareen gadgaddoonno xooggan xagga sicirka oo la filayo in ay muddo sii jiri doonaan. Sidaa awgeed, waxay u badantahay in ku tiirsanaanta la soo bixidda khayraadka dabiicga ah ayan horseedayn jid kale oo loo maro horumarin waxsoosaar warshadeed. Taa beddelkeeda, waddo lagu kalsoonaan karo oo loo maro horumarin waxsoosaar warshedeed oo dalalkaasi ay gaaraan waxay ka fuli kartaa suuragelinta in la dhiso oo la xoojiyo iskudhafka la xiriira soosaaridda badeecooyinka muhiimka ah.

2. Waaya'aragnimada Hirgashay

Waaya'aragnomada hirgashay waxay u muuqataa mid ka horjeedda in iskudhafka badeecooyinka loo adeegsado qorshe warshadayn. Waaya'aragnimada hirgashay ee ah doodda "ibtilo khayraad" waxay ku tagtay in xiriir aan xoogganayni ka dhexeeyo badeecooyinka muhiimka ah iyo waaxda dhaqaale ee waxsoosaarka warshedeed. Waxaa kale oo iyana jirta in kutalaxtegidda ku tiirsanaanta badeecooyinku ay

majaxaabo ku tahay horumarinta waxsoosaarka warshadeed. Arrinta ay isugu soo biyashubanayso saamaynta taban ee waxsoosaarka warshadeed ku leedahay waxaa in badan laga dheehanayay cilmiga dhaqaalaha horumarineed ee waxsoosaarka teelteelka ah ee waaxda dhaqaale ee badeecadaha muhiimka ah la xiriidha.

Ha se ahaatee, fikradda duqowday ee wax badan la isu soo dhiibayay waa mid wax ka khaldanyihiin. Ugu horryn, waxaa jira caddaymo laga helayo taariikhda dhaqaale ee dalalka waxsoosaarkooda warshedeed horumaray, sida; Kanada, Maraykanka, Iswiidhan, Norway iyo Australiya, kuwaa oo sheegayaa in xiriirro qoto dhaadheer ay ka dhexeeyaan waxsoosaarka warshadeed iyo waaxda dhaqaale ee khayraadka dabiiciga ah. Caddaymahaa taariikheed waxaan ka maqnayn in lammaanaansho waxisdhaafsi taban ku sal leh oo koboca waxsoosaarka warshadeed ay kaabeen xiriirro iskudhafeed oo ka la dhexeeya waaxda dhaqaale ee badeecooyinka muhiimka ah. Taasi waxay keentay in firfircoonida awoodeed ee ka dhalata waxsoosaarka warshadaha dib loogu adeegsado soosaaridda badeecooyinka muhiimka ah, iyada oo kharashka ku kaca hoos loo dhigayo, sidaana ay u fududaato in la manaafacaadsado khyaraadka aan maalgelinta xooggan loo hurin, sida macdanaha, shidaalka dhulka ku kaydsan iyo dhulbeereedka.

Waxaa iyana taa sii dheer, waaya'ragnimada cilmiga ku dhisan marka laga hadlayo, waxaa jiray arrimo badan oo ka oo cusboonaaday dhaqaalaha adduunka sannadahan dambe, kuwaa oo fursado hor leh siinaya dalalka dhaqaalahoodu ku tiirsanyahay badeecooyinka muhiimka ah. Arrimahaa waxaa ugu waawaynaa koboca xawlliga sare leh ee dhaqaalaha Shiinaha. Shiinaha oo dakhligooda GDP uu aad khayraadkooda ugu tiirsanyahay ayaa kobociisa dheeraynayaa sababay sicirka badeecooynka oo kor aad ugu kaca sannadkii 2003. Se markii kobocii GDPda Shiinuhu gaabis ku yimid ayay heerarkii sicirradu dib u gurteen oo hoos u dhaceen. Bishii Agoosto 2015, sayladda *Bloomberg Commodity Index* ayaa waxay hoos ugu duntay heer aanay 16 sannadood gaarin[1]. Sababo kala duwan oo kuwo siyaaseed iyo dhaqaale isugu jira ayaa saamayn ku leh heerarka sicirka ee waagan jira, sicirradaana laga fili mayo in wax iska beddelaan inta ka horreysa dhammaadka sannadka 2017.

Ha se yeeshee, heerarka koboca gaabiska ah ee dhaqaalaha Shinnaha badanaa waxaa daboola mugga batroolka iyo macdanaha looga baahanyahay suuqyada gudaha ee dalka. Iyada oo ay dhab tahay in heerka dalbka batroolka iyo macdanuhu uu hoos u dhacayo, guud ahaan wali waxaa jira koror tayo leh oo lagu doonayo badeecoocinkaa. Jaantuska 1aad waxaa ka muuqda batroolka dibadda laga soo dejiyo, macdanaha iyo biraha iyo alaabada ceedhiin ee beeraha (qiime qiyaas dheefsasho ah) Hindiya iyo Siine tobanlihii sano ee la soo dhaafay. Marka la reebo hoosudhac yar oo sannadkii 2004 ku yimid sicirka biraha (kaa oo aan tirada la xiriirin ee xagga qiimaha ahaa), doonista Shiinuhu is ma dhimin, xataa waayadii dhawaa ee qiimejabku jiray.

[1] http://www.bloomberg.com/news/articles/2015-08-24/bloomberg-commodity-index-slides-to-lowest-level-in-16-years

Jaantus 1: Badeecoyinka muhiimka ah ee Shiine iyo Hindiya dibadda uga soo degay iyo qiimaha (2000-2014)



Tixraac: Trade data from WITS <wits.worldbank.org>, Price data from IMF.Org accessed December 2015

Waxaa walaac laga muujiyay in sicirrada badeecada muhiimka ah ay mar kale dib u guranayaan, sidii dhacday ka dib barwaaqadii muddada yar ku sinnayd ee sannadihii 1970-meeyada. Si ay ahaataba se, dhaqaalaha adduunka waxaa si isa soo taraysa u riixaya dalalka dakhligooda dhaqaale heer hoose-dexe yahay ee u soo jeestay ballaadhinta kharaska ku baxa dhismaha kaabayaasha isgaarsiinta, dalalkaa oo macdanaha iyo tamarta ugu badan lagu adeegsado.

Shiinuhu wuxuu dunida ka dhex noqday awood wayn xagga la soo degidda dibadeed ee badeecooyinka muhiimka ah. Waxaa soo raaca Baraasiil iyo Hindiya oo ah quwadaha kale ee dhaqaalahooda qofeed hooseeyo se tobanlayaasha sannadaha soo socda iyaguna kordhin doona dalabkooda badeecooyinka muhiimka ah.

Iyada oo laga eegayo koboca isa soo taraya ee dalabka badeecooyinka muhiimka ah, qimaha oo mustablka la filayo in uu kaco, muuddada dheer ee ay qaadan karto kordhinta tirada badeecooyin badan oo muhiim ah iyo laasashada alaabooyinka qiimaha jaban, waxaa xoogaysanaysa doodda ku saabsan in badeecooyinka muhiimka ay saldhig u noqdaan warshadayn hirgasha, iyada oo xataa waayadan sicirka suuqyada dunidu hoos u dhacsanyahay.

3. Badeecooyinka Muhiimka ah, Sicirka Suuqyada Dunida iyo Erginta Dibadeed ee Waxsoosaarka

Rejooyinka iskudhafka suuqyada badeecadaha muhiimka ah soo saara waxaa kor u qaaday afar arrimood. Kowaad, Afrika waxay noqotay suuq hor oo soo saara badeecooyinka muhiimka ah. Sida maareeyaha guud ee Glencoe (soosaaraha-ka ganacsadaha adduunka ugu sita ee badeecooyinka muhiimka ah) uu sheegay, ka hor intii aan shirkaddaa saamiyo dadwaynaha laga siin 2011, “nasiib xumo, Alle macdanta meelo kala duwan oo dunida ah ayuu ku abuuray. Markii hore tii ugu wanaagsanayd, ugu sahlanayd oo ugu fududayd ayaannu Australiya ka soo qaadannay, Maraykanana waannu ka qaadannay, Koofur Afrikana waa tagnay oo halkaa dhulka ka qodannay. Hadda se waa in aannu aadna meelo fogfog [aan xasilloonayn] [Afrika].”

Labaad, dibu’eegidda lagu sameeyay xiriirka ka dhexeeya badeecadaha muhiimka ah, warshadaynta iyo koboca dhaqaale ma sugayso fikradda rejoxumada leh “ibtilada khayraadka” ee badanaa lagu cabbiri jiray caqabadda hor taagan isbeddelka qorsheed ee dalalka dakhligooda dhaqaale hooseeyo.

Saddexaad, ka dib sannado badan oo qiimaha guud hoos u dhacayay, waxay u muuqataa in qiimaha sii kacaya ee badeecooyinka muhiimka ah (marka loo eego sannadihii 1990-meeyadii) uu sidiisaa sii ahaan doono.

Afaraad, sida aynnu arki doonno, in badan oo ka mid ah shirkada ugu horreeya ka ganacsiga badeecooyinka muhiimka ah ma doonayaa in ay suuqa guud gooni ka istaagaan ee waxay aad ugu dadaalayaan in ay kharashkooda waxsoosaar dhimaan iyo in ay shaqooyin badan oo aan takhasuskooda gaar ahaaneed ahayn dibedaha u diraan.

Marka loo eego fursadaha ku jira kor u kaca qiimaha badeecooyinka muhiimka ah, sidee Afrika u qaadi kartaa tallaabo ay ku sugto in faa’iidooyinkaasi sii baahaan, si dadar loo geliyo horumarin sii waarta oo dadwaynaha guud wada gaadha dhaqaalaha guudna looga ilaaliyo khalkhal ku dhaca suuqa badeecadaha muhiimka ah?

Hal arrin oo muhiim ah oo sidii yoolkaa loo gaari lahaa gacan ka geysan karta waa in dardar la geliyo iskuxirka waxsoosaarka warshadaysan iyo kan adeegyada ee suuqa badeecooyinka muhiimka ah.

Waxaa jira saddex nooc oo iskuxirro ah. Kan hore waa dhanka miisaaniyadda, kirooyinka khayraadka dal leeyahay ka soo baxa oo dawladdu ay awood u leedahay in ay waaxda badeecooyinka muhiimka ah uga qaadato qaab canshuurid shirkadeed, gunnooyin iyo canshuur laga qaado dakhliyada soo gala shaqaalaha. Kirooyinkaa

waxaa loo adeegsan karaa in dardar la geliyo horumarinta waxoosaarka warshedeed ee ka baxsan waaxda badeecooyinka muhiimka ah. Nooca labadaad ee iskuxirrada muhiimka ah ka mid ah waa kan dheefsiga guud. Dalaabaadka laga doonayo waaxaha kale ee ka dhasha kharashyada ka baxa waaxda badeecooyinka muhiimka ah. Nooca saddexaad waa iskuxirrada xagga waxsoosaarka horusocod, dibusocod iyo gudban intaba leh ee ku lammaan soosaaridda badeecooyinka muhiimka ah.

Waxaa soo jireen ahayd fikrad ka hirgashay golayaasha siyaasad dejinta lana xiriidha aragtida “ibtilo khayraad” oo qeexaysa in iskuxirradaa waxsoosaar aanay sidaa u sii xoogganayn timaaddadana aanay faa’iido u yeelanayn, sabata oo ah fikirka “enclave” ee ay ku dhaqmaan shirkadaha waawayn ee ku hawllan soosaaridda khayraadka. Shirkadaha soosaara khayraadka oo door bida in ay gooni ka joogaan dhaqaalaha guud waa mid ay dhici karto in ay soojireen ahayd. Ha se ahaatee, shirkadda casriga ah ee khayraadka soosaariddiisa ka hawllan waxay u shaqaysaa si la mid shirkadaha MNC waawayn ee jira waayahan dunidu isu furantay. Isufuranka dunida oo sii xoogaystay ka dib sannadihii 1970-meeyada ayaa wuxuu horseeday tartan xooggan maadaama ay shirkadaha soo food saareen tartamayaal fara badan. Mid ka mid ah falcelinnada ugu waawaynaa ee tani keentay ayaa ah in shirkaduhu ay xoojinyeen sidii ay shaqadooda ugu ekayn lahaayeen kaliya meelaha ay khibradda u leeyihiin uun; shaqooyinka sida gaarka ah ay ugu qalmaan, shirakaddaa u goonida ah, ay adagtahay in la la soo galo, aan laga dheegan karin, suuqa qiime wayn ku leh, faa’iidada ugu waynna laga heli karo.

Arrimahaa waxaa ka dhashay in hawlaha aanay shirakkduhu takhasuuska gaarka ah u lahayn loo barabixiyo dalal dibedda ah oo qiime jaban looga soo saari karo iyo in shirkadaha iyo dalalku ay ku takhasusaan hawlo gooni ah intii ay ku wada tiirsanaan lahaayeen soosaaridda alaabooyinka guud uun. Taasi waxay kor u qaadday in la ka qoqobo oo loo qaybiyo waxsoosaarka waaxo aad u tiro badan oo si is garab socota loo soo saaro isku mar. Maadama khasaaraha heerarka waxsoosaar yaryahay tiraduna aanay is dhimayn, ma jirto baahi muuqata oo keenaysa in meel la isugu geeyo. Inta ay sii badato taxnaanta heerarka waxsoosaar waxaa sii bata qiimaha ku kordhaya heer walba, taasina waxay sii suuragelinaysaa takhasuska waxsoosaar ee gaarka ah. Guud ahaan waxay tani ka dhacdaa waaxda dhaqaale ee waxsoosaarka warshdeed ee badeecada heerkeeda soosaar ee ugu dambeeyay lagu dhiso iyada oo la eddgsanayo alaabo iyo qalab meelo kala duwan laga keenay (sida warshadaha baabuurta sameeya oo kiiba u adeegsada in ka badan 3000 shay oo kala duwan). Sidaa awgeed, waxay ku dhisanyihiin waxsoosaar firdhin caalami ah. Sidaa ayaa waxaa ku soo baxday awoodda caalamiga ah ee shirkadaha ku dhisan qaybsiga heerarka kala duwan ee waxsoosaar ee loo yaqaan *global value chains* (GVCs), firdhinta caalamiga ah ee heerarka waxsoosaar iyo soo ifbaxa shirakado u adeegga waxsoosaarka warshadeed ee Aasiya oo awood u leh in ay ka faa’iideystaan fursadahaa la yimid waagaan casriga ah ee dunidu isu furantay.

Waaxaha daqaale ee khayraadka ku dhisan ruuxooda waxaa ugu horreeya shirkadaha *global value chains* waxayna raacaan qaab la mid kan dibedaha loo barabixiyo waxsoosaarka ee loo yaqaan *outsorcing*. Sidaa oo ay tahay, waxaa jira farqi muhiim ah oo u dhexeeya waaxahaa dhaqaale ee soo saara badeecooyinka muhiimka ah. Iyada oo sababtu tahay in ay hal meel oo sugan uun saldhig ka dhigtaan ayay waxay

abuuraan in fursad heerarka waxsoosaar ee firirsani ay heer walba qiime ku sii kordhiyaan isla hal dal gudihi. Tusaale ahaan, alaabooyinka ceedhiin ee ay ka mid yihiin macdanaha iyo dalagga beeraha ka soo go'a waxaa lagu doorin karaa oo dabadeed lagu soo saari karaa xiriir heerar is dabajooga ah inta aan la dhoofin. Waxsoosaarka gudaha isaga si fudud ayaa dalka gudigiisa looga fulin karaa. Haddii loo eego qiimaha ay GVCs ku kordhiyaan heerarka waxsoosaar ayaa loo yaqaan *additive value chains.*

Waaxda dhaqaale ee waxsoosaarka khayraadka waxaa badanaa ku xooggan *additive value chains,* sababo dhawr ah dartood. Tan koowaad, hirgelinta qiime kordhinta ee dalka gudihiisa waxay ku xirantahay dabeecadaha farsamo ee heerarka waxsoosaarka. La soo bixidda khayraadka dabiiciga ah guud ahaan waa maguuraan waxayna ku xirantahay hantida dabiiiciga ah ee hadba jirta.

Intaa waxaa dheer in badanaa ay hadba khayraad gooni ah ka faa'iidaysigu khuseeyo, maadaama aanay laba khayraad dabiici ah ama dhulalka ay ku jiraan aanay isku mid ahayn. Heerarkaas kala duwan ee waxsoosaarku maro mid walba waa qiime ku kordhin loo baahanyahay, taa oo macnaheedu yahay in ay yihiin iskuxigyo ka dhasha hadba heerarka hore ee doorinta waxsoosaar. Tan labaad, sida lagu yaqaan ku dhawaad dhammaan khayraadka dabiiciga ah, waxaa dhaca in badan oo cuf iyo culays ahi ay ku lumaan heerarka kala duwan ee waxsoosaarku maro ama tayada waxsoosaarka dalagga beereed ay hoos u dhacdo haddii aan degdeg loogu doorin qaab kale marka la soo gooyo. Se tani mar walba ma dhacdo. Tusaale ahaan, si dhadhanka loo daryeelo, dubidda iyo shiididda bunku waa in ay dhacaan mar aad ugu dhow marka la cabbayo. Tan saddexaad, marka faa'iidada laga helayaa ay yartahay tartan xoogganna uu ka dhexeeyo soosaarayaal badan, shirkadaha waawayni waxay badanaa dhiirrigeliyaan dalalka soosaara khayraadka ay u adeegsadaan heerarka kala duwan ee waxsoosaarka qiimaha ku kordhiya.

Iyada oo loo eegayo maalgelinta iyo soosaarka iyo xogaha ganacsiga ayaa waxaa la qiyaasayaa in 85% ganacsiga GVC adduunku uu ka dhex dhaco saddex gobol oo kala ah Aasiyada Bari, Waqooyiga Ameerika iyo Yurub, saddexmeelood oo meel ganacsigaa ka mid ahna waxa uu ku lug leeyahay adeegsiga alaabooyin dibedda laga soo dejiyay oo loo adeegsado kaabidda waxsoosaarka dibedda loo dhoofiyo. Si kale haddii loo dhigo, ganacsiga GVC badankiisu waxa uu ku lug leeyahay takhasusyo gaar ah ama sida loo yaqaan "backward specialisation". GVCyadaa ayaa iyagu si aad ah uga hormaraya adeegsiga habka qiime ku kordhinta. Ha se ahaatee, sida ay isu soo tarayaan GVC dalalka dhaqaalahoodu khayraadka ku tiirsanyahay iyo kuwa dakhligoodu hooseeeyo ama meel dhexe yahay waxaa laga dheehan karaa hadba horumarradaa dunida ku soo kordhaya sida ay u la jaanqaadaan. Tusaale ahaan, qaabka uu yahay sida ay Afrika ku soo gashay GVC aad ayuu uga duwanyahay qaabka uu egyahay kan caalamaiga ah. 75% ganacsigeedu waa hab qiime ku kordhineed "forward specialisation" VC, badankkooda qiime ku kordhinta takhasusyada gaar ahaaneedna ku dhisanna "backward specialsation" waxay ka dhacaan Koofur Afrika. Taa waxaa keena in GVCyada waaxda khayraadku uu ku xoogganyahay habka qiime ku kordhintu (in kasta oo lagu weheliyo).

MNCyada soosaarka khayraadyada qodida saliidda iyo gaaska ku tiirsan, in kasta oo ay badanaa yihiin kuwo waa dambe soo biiray ku takhasusidda goonida ah iyo dhoofinta shaqaalaynta, waxay ugu dambayntii noqdeen kuwo u hawlgala sida kuwa

takhasuskoodu qaabka gudban ee heerarka waxsoosaarka ku lugleeyahay. Waxay si isa soo taraysa u daneeyaan in ay takhasusyadooda hoose ku ekaadaan dhammaan wixii ka soo harana ay u dhoofiyaan ama gudbiyaan shirkado kale. Shirkadahaa soosaaridda u adeegaa waxay ka ag dhowyihiin soosaaridda khayraadka waxayna awoodaan in ay qiime jaban iyo tayo la isku hallayn karo laga helo, ama waxay si qumman u hagaajiyaan badeecooyinka muhiimka ah iyaga oo si toos ah u fulinaya danaha shirkadahakhayraadka la hagaajinayo soo saara. Haddii loo eego jawiga maalgashi ee maanta ka taagan suuqyada adduunka, waaxda soosaaridda khayraadka caalamiga ah qaabkaa ayay isugu dhuratay, iyada oo xoogga la saarayo maaraynta kharashyada ku baxa waxsoosaarka. Sidaa awgeed, dhoofinta shaqaalaynta meelo lagu soo saaro qaybaha kala duwan ee isla hal badeeco ka koobantahay si aan hore loo arag ayuu u xoogaystay. Sidaa awgeed, aad ayuu maanta xaalku uga duwanyahay waagii shirkadaha waawayni ay is hor taagi jireen dismaha iskuxirrada ganacsi, sida ay fikradda ibtilada khayraadku sheegayso. Waagan la joogo iyaga horumarinta iskuxirradu waxay ay ugamid tahay yoolashooda ugu waawayn.

Marba haddii shirkadaha waawayni ay go'aansadaan in ay qaybo waxsoosaarka ka mid ah oo aan takhasuskooda ahayn ay dhoofiyaan ama shirakado kale qandaraas ku siiyaan, shaqada ugu horreysa ee ay ku dhaqaaqaan waxa ay ahayd sidii ay ku heli lahaayeen qandaraasleyda qiimahaha ugu jaban ku hawl gala oo awooda soosaaridda tayada loo baahnyahay xilliga loo cayimana laga heli karo. Qandaraasleyaal awooda in ay ku hawlgalaan farsamo heer sare ah oo u diyaar ah ayaa aad loo jeclaa, gaar ahaan kuwooda heerka ugu sarreeya ah. Ha se yeeshee, fikradda ka dambaysaaa waxay ahayd uun in halkii ay suuragal ka tahayba shirkadahaa qandaraaslayaasha ahi waxsoosaarka adeega ay ka dhigaan meel dhow oo gudaha ah intii ay dibedaha u gudbin lahaayeen ama meel masaafo dheer u jirta halka ay ka shaqeeyaan shirkadaha waawayn ee dalabka siiya iyaga. Halkaa ayay ka socotaa fikradda ah in "local" (degaan) fikrad la xiriidha uu mar walba "ka dhowyahay dibed"! taa oo macnaheedu yahay in maraka qaarkood ay aad ugu dhawaan karto halka khayraadka lagu shaqaynayo laga soo saarayo, mararna degaan aan ka fogeyn oo isla dalkaa ama qaaradda ku yaal. Qodobka ugu nuxurka badani waa in taasi ay ka tarjumayso dadaal lagu yaraynayo masaafada dalabaadka loo baahanyahay laga keenayo iyo halka iyada oo doorsan lagu soo saarayo. Qandaraasle hawlkar ah oo deegaanka ugu dhow ka hawlgala waxa uu soo biirinayaa awood waxqabad dhan walba u loodsami karta iyo u dhaganuglaan shirakadda wayn ee qandaraaska siisay, taa oo u oggolaanaysa in tirada heerarka waxsoosaar la dhimo kana hor tegaysa walaaca ka dhalan kara saadka waxsoosaar oo baahid la tabardarreeya. Sida kale, marka loo eego cadaadisyada waagan ka imanaya in la dhimo kharashyada waxsoosaarku saato, shirkadaha waawayn xiisaha ay u qabaan in qandaraaslayaashoodu ay aad ugu dhawyihiin ayaa sii xoogaystay.

Shirkadaha khayraadka soosaariddiisa ku hawllan waxay beryahan isugu dhurteen in ay gooninimada ka door bidaan oo ay qandaraaslayaaal madaxbannaan oo dibedda ah ku wareejiaan ku dhawaad dhammaan heerarka kala duwan ee waxsoosaarka warshadeed, xataa alaabada raasamaalka ah iyo waxsoosaarrada heerka dhexe. Doorbididdan in la helo qandaraasle deegaanka dhow ah oo la isku hallayn karo waxay gaar ahaan ku sii xooggantahay qaaradda Afrika. Taa waxaa sabab u ah gaadiidka iyo dhismayaasha kaabayaasha muhiimka ah ayaa aad u liita, maxaa yeelay alaabooyinka

laga keeno dibedda waxaa la soo gudboonaan karta xannibaado daahiya oo aan la malayn karin oo waqtiyo dhaadheer qaadan kara iyo siyaasadaha dawladda oo badanaa jideeya qiimekukordhinta heerarka waxsoosaar ee dalka gudihiisa ah. Shirkadaha qandaraaslayaasha ah waxay taa kaga falceliyeen in ay ruuxoodu heerarka waxsoosaar ku milmaan. Tusaale ahaan, shirakadda Bell Equipment ee dalka Koofur Afrika waxay takhasuskeeda ka dhigatay qodidda kaawooyinka macdahaha dabiiciga ah, dabadeedna waxay noqotay qandaraasle mashiinnada wax lagu qodo gaarsiiya suuqyada gudaha ee ay ka mid yihiin kuwa macdanaha qoda, kuwa dhismaha, warshadaha sokorta iyo kuwa kaymaha ka shaqeeya. Waxaa kale oo kordhaysay in qandaraasleyaal madaxbannaan lagu wareejiyo farsamaynta badeecooyinka takhasususka aqooneed ee gaarka ah u baahan, taana waxay horseedday soo ifbaxa shirakadaha shaqooyinkooda la isku yiraahdo *intensive mining services providers* (SKIMS), kuwaa oo aan ku shaqayn takhasuskooda gaar ahaaneed uun e hawlagallada kale ee waxsoosaarka teknoolojiyada heerka sare ah la xiriira ka qaybqaata. Waxaa ka mid ah shirkadaha ay ka mid yihiin *SRK* ee Koofur Afrika oo ku bilaabatay qandaraasle ka hoos shaqeeya Anglo American dabadeedna u xuubsiibatay in ay la taliye caalami ah ka noqoto qodidda macdaha adduunka oo dhan. Anglo American waxay waddaa barnaamij houmarinta qandaraaslayaasa ku saabsan oo ka jira badanaa dalalka ay ka hawl gasho, sida mashruuca Zimele ee Koofur Afrika. Horumarinta qandaraaslayaasha deegaanka ka hawlgala waxaa ku sii horreeya dalka Chile oo shirakadaha caalamiga ah ee macdanaha qoda ay si xooggan ugu hawllanyihiin in ay awooddooda qandaraas qaadasho u xoojin lahaayeen. Tusaale ahaan, BHP Billiton waxay Chile ku leedahay mashruuc horumarineed oo ballaadhan.

Si hawlagalku joogto u noqdo, waxsoosaaraddaasi badanaa waxay u baahanyihiin xeelado sare aadna waa u kala duwanyihiin. Waxay isugu jiraan laga bilaabo heerka hoose ee iskuxirxirka iyo warshadaynta bilowga ah ee xarkaha danabka qaada ee loo adeegsado in ay ceelasha saliidda ee badda hoosteeda uga sii gudbiya maraakiibka dusha sare dabadeedna xagga berriga sii gaarsiiiya waxsoosaarka batroolka dalka Angola. Ama waa waxsoosaarro aan teknoolojiyo sare u baahnayn oo isugu jira laga bilaabo kuwa adeegyada asaasiga ah (biyaha iyo korontada), adeegyada looga baahanyahay nafaqaynta shaqaalaha, ilaa qalabka kabidda iyo xafiisyada. Xagga waaxda dhaqaale ee badeecooyinka fudfudud waxay ka hawlgalaan heerarka waxsoosaar ee la xiriira miraha abuurka beeraha, bacrimeyeyaasha, baakadaynta iyo gaadiidka lagu qaado.

Waxsoosaarkaa alaabeed waxaa dheer in waxsoosaarka joogtada ah uu u baahanyahay waxsoosaarro kale oo waaxda adeegga ka yimaada. Adeegyadaa qarkood waxaa dhici karta in ay aqoon teknoolojiyadeed oo heer sare ah doonayaan. Se xataa qaybtan waxaa ka muuqda ifafaalayaal muujinaya horumar xagga hawlgallada takhasuska gaarka ah leh ee suuqayada waxsoosaarka Afrika. Tusaale ahaan, waaxda waxsoosaarka batroolka ee dalka Nigeria waxaa jira qandaasrayaal badan oo deegaanka ah oo soosaara adeegsayada ITga. Dalka Zambia waxaa ka jira shirakado fuliya adeegyada injineerinta, kabidda iyo hagaajinta oo door culus ka ciyaaray dhismaha awood waxsosaara warhasdeed. Sidaa oo kale, shirkadaha Shiinuhu leeyahay ee saliidda ka qoda Suudaanta Koofureed waxay dhiirrigeliyeen qandaraasleyaal badan oo degaanka ka hawlgala oo ka kooban ilaa 90 shirkadood oo ay ka shaqeeyaan shaqaale ka badan 4600 oo qof. Adeegyada kale ee ay ka mid yihiin

kuwa qalabka shaqaalaha nabadgelyadu ay ilaalinta soogelidda xarumaha sahqo u adeegsadaan, gaadiidka iyo saadka, hagaajinta qalabka xafiisyada, iyo adeegyada xisaabintu u ma baahna xeelad teknoolojiyadeed sare, ka shaqagalkooduna ma dhib badna.

Isugeynta waxsoosaarradan iskucelcelska ah iyo dalabka joogtada ah ee shirkadaha waawayn ay ku doonayaan erginta qandaraasyo madaxbannaan oo ay ku bixiyaan wixii takhasuskooda gaar ahaaneed ka baxsan waxaan ka dhex arki karnaa in faa'iido wayni ka iman karto xiriirrada iskucelceliska degaameed ee heerarka waxsoosaarka ee waaxda dhaqaale ee badeecooyinka muhiimka ah. Iyada oo shaqada waaxda waxsoosaarka badeecooyinka muhiimka ah ay ruuxeedu hawlgal ballaaran tahay teknoolojiyo ahaanna heer sare oo adag caado u leedahay, waxaa dhacda in tani alaabooyin badan oo dhexyaal ah waaxdan waxsoosaarna ay ku tiirsantahay aanay saamayn ku yeelan. Sidaa awgeed, la yaab ma leh in iyada oo aad loo rumaysanyahay fikradda sheegaysa in soosaaridda badeecooyinka muhiimka ah ay shaqo gaar ahaaneed tahay ay isla markaa dhab ahaan iskuxirro badan ku khasbaysay welina ku khasbanyihiin ku milanka dhaqdhaqaaqa waxsoosaar ee dhaqaalaha deegaanka ay ka hawlgalaan. Halka uu gaarsiisanyahay heerka iskuxirradaa dabci ahaan waxa uu ay ku xiranyahay awoodda shirkadaha degaanka, saadkooda waxsoosaar iyo kharashka dhismaha iyo isgaarsiinta ku baxa. Se, in kasta oo heerka awoodeed ee shirkadaha degaanku le'egyahay, waxaa mar walba jira heerar ay kaga qaybqaadan karaan adeegga waxsoosaarka oo ay awood u leeyihiin shirkadahaa degaanku.

4. DULMAR KU SAABSAN SIDA ISKUXIRRADA WAXSOOSAAR KU YIMAADAAN

In la helo fahan aad u qoto dheer oo loo yeesho *iskuxirro waxsoosaar* ee la xiriira heerarka kala duwan ee waaxda khayraadka waxay lafdhabar u tahay fahan ka sii qoto dheer oo loo yeesho fursadaha uu ku hirgeli karo dhaqaale khayraad ku dhisan oo ay Afrika yeelato. Iskuxirrada waxsoosaar waxay toos iyo dadabba uga shaqaysiiyaan waaxda khayraadka waxayna fure u yihiin horumarinta dhaqaale khayraad ku tiisran oo ay Afrika yeelato. Kuwa toos iyo dadab waxsoosaarka u la xiriira waxaan ka tilmaami karnaa saddex qaybood:

- Kuwa loo yaqaan *backward linkages* oo ah qandaraaslayaasha sida tooska ah ugu adeega waaxda waxsoosaarka khayraadka. Kuwaa ayaa waxay isugu jiraa laga soo bilaabo heerarka teknoolojiyadeed ee sarreeya ilaa qalabaynta shaqaalaha, waxayna kala leeyihiin heerar kala duwan oo ay suuqa ku soo galaan. Iskuxirradaa waxay taariikh ahaan door wayn ka soo qaateen kobcinta warshadaynta dalal badan oo isugu jira Maraynka qarnigii 19aad ilaa lagu keeno Koofur Afrikada maanta ee qarniga 20aad.
- Iskuxirrada loo yaqaan *forward linkages* iyagu waa heerka waxsoosaarka hore ee ku sahqo leh u adeegsiga badeecoouinka waaxaha kale ee waxsoosaar. Waxay isugu jiraan laga bilaabo waxsoosaarka bilowga ah (macdanta ceeriin oo bir loo rogo, saliidda ceeriin oo batrool loo rogo) ilaa u rogidda alaabada ceeriin waxsoosaar warshadaysan (birta la hagaajiyay oo digsiyo iyo daawayaal laga sameeyo, looxa oo alaabta guryaha la dhigto loo rogo).
- Iskuxirrada waxsoosaar ee loo yaqaan *horizontal linkages* iyagu waa kuwo si toos ah u halwgala. Waxaa laga wadaa awoodda shirkadaha qandaraaslyaasha ah ee u adeega waxsoosaarka shirkadaha waawayn ee asal ahaan la la xiriirayo

waaxda waxsoosaar ee khayraadka se siyaabo kale oo badan xiriirka u la leh waaxaha kale ee waxsoosaar.

Waxaa iyana jirta in lagu qeexi karo farqiqa u dhexeeya qotodheeraanta iyo baahsanaanta iskuxirradaas waxsoosaar. “Baahsanaan” waxaa loo la jeedaa heerarka waxsoosaar ee u adeegga ama ka yimaada la soo bixidda khayraadka dal. Tusaale ahaan, tan waxaa laga dheehan karaa saamiga ay shirakdaha u adeega kuwa soo saara khayraadka ee degaanku. Ha se yeeshee, erginta waxsoosaarka macnaheedu waa iskuxirrada degaanku in ay yihiin la soodageyaal qandaraas waxsoosaar toos ah oo ay hore uga heleen shirkadaha waawayn ee khayraadka ku hawllan. Waxay kale oo ku lug yeelan karaan in ay qiime ku sii kordhiyaan heerarka dalabyada waxsoosaarku maraan. Sidaa awgeed, “baahsanaan”ta iskuxirradu waa arrin gooni ah oo ka mid ah abuuridda heerarka iskuxirrada oo khuseeyaa heerka uu le’egyahay qiimaha shirkadaha degaanku waxsoosaarka ku biirshaan. Waxaa halkaa ka cad in gaaridda horumar warshadayn oo ku tiirsan khayraad uu aad u la xiriiro abuuridda iskuxirrada noocyadan ah.

Uga dambayn, waa in la kala saaraa iskuxirrada degaanka ah iyo lahaansiyaha degaanka ah. Marka laga hadlayo dardargelinta warshadaynta iyo saamaynta degdegga ah ee ay ku leedahay shaqaalaynta iyo dhaqaalaha ka soo baxa, sii xoojinta heerarka qiime ku kordhinta waxsoosaar ee degaanku waxay u tahay lamahuraan abuuridda iskuxirro waxsoosaar. Sidaa darteed, waa gef in la isku khaldo iskuxirrada waxsoosaar ee degaanka ah iyo lahaanshiyaha degaanka (qaran). In badan oo ka mid ah dawladaha Afrika ayaa waxay u muuqdaan in ay khalad u fahmaan arrinta horumarinta iskuxirrada waxsoosaar ee degaanka ah iyaga oo u haysta in ay uun qayb ka tahay lahaanshiyaha degaanka intii ay u fahmi lahaayeen xoojin qiime ku kordin heerarka kala duwan iyo horumarinta waaxda waxsoosaar ee degaanka. Tan macanaheedu ma aha in laga wado lahaanshiyaha degaanka ahi muhiiim u ma aha iskuxirrada horumarintooda maadaama shirkadaha degaanka laga leeyahay ay bulshada ka ag dhawyihiin ayna u badanyihiin in ay fikir waxsoosaar abuuraan.

Sida kor ku xusan, waa suuragal in qaab guud oo iskuxirro waxsoosaar ah la dejiyo, kaa oo loogu talo galay hirgelinta warshadaynta ku salaysan deegaamaynta waxyaalihii hore dibedda looga soo dejin jiray iyo baahida isa soo taraysa ee loo qabo erginta dibadeed ee waxsoosaarka shirkadaha waawayn. Jaantuska 2 ayaa sharraxaya waxa qaabkan guud ahaan ka koobanyahay. Diillinta qotonka ah waxay ka dhigantahay halka uu ku ururo qiimaha lagu kordhiyo alaabooyinka soosaaridda badeecadaha muhiimka ah. Haddii loo eego waxa laga ogaan karo fikradda takhasusyada gaarka ee waxsosaarka, waxaan dhinac ka garan karnaa in waxsoosaarka shhirkadaha waawayn aanay dan tooska ah ka lahayn soosaaristooda maadaama aanay khusayn takhasusyadooda gaarka ah. Kuwaa ayaa lagu magaacaabaa iskuxirrada *win-win,* taa macnaheedu waa in shirakadaha waawayn iyo qandaraaslayaasha degaanku iyo macaamiishoodu ay isku dan ka yihiin horumarinta iskuxirrada waxsoosaar ee degaanka ka jira. Dhinaca kale, waxaa jira hawlo waxsoosaar oo badan oo la xiriira takhasuska gaar ahaaneed ee shirkad wayn, kuwaa oo aanay doonayn in ay u gacangalaan shirkad kale oo tartan ka dhexeeyo. Kuwaa ayaa lagu magacaabaa iskuxirrada *win-lose*, shirkadaha waawaynina waxay

fursadahaa sii daynayaan kaliya marka ay ku khasabto siyaasad dejin shaqaynaysa ama arrimo qorshaha hawlgal la xiriira.

Diillinta gudban waxay ka dhigantahay waqtiga. Xoodanku waxuu tusayaa in saamayn guud oo ka dhalatay dhisidda awoodda hawlgalka degaameed ee isa soo tarta iyo sida xooggan ee shirakadaha ugu horreeya waxsosaarka badeecooyinka muhiimka u goobayaan erginta waxsoosaarka soo gala iyo kan ka baxa ee aan ku jirin takhasusyadooda gaar ahaaneed. Markaa waxaa jira abuurid iskuxir suuqu khasab ka dhigo. Waxaa dhacda markii xilli la joogaba in qayb wayn oo waxsoosaarka shirkadeed ah marka hore loo ergiyo shirkado kale oo degaanka ka hawlgala. Heerka erginta dibadeed marka hore waa gaabis, dabadeedna waa sii xoogaysataa ilaa yoolasha la haaban karo oo dhammi idlaadaan. Horraanta xawlliga isbeddelku waa gaabis marka awoodda waxsoosaarka warshadeed ee dalalku ay liidato, soosaaridda badeecooyinka muhiimka ah ay heer bilow ah joogto, meelaha waxsoosaar aan badnayn looga baahanyahay iyo/ama meelaha qorshaha siyaasad dejintu dhaqaale uu liito. Marka ka soohorjeedk taa uu hirgalo, heerka isbeddelku waa mid sarreeya. Marka ay taban tahay, waxay dardar xoog leh gelin kartaa oo/ama sii xoojin kartaa horumarinta iskuxirrada. Marka ay togan tahay, waxay gaabis/debecsanaan ku keeni kartaa horumarinta iskuxirrada waxsoosaarka.

Jaantus 2: iskuxirrada suuqu keeno ee waqtiga la socota



Halbeegga sii xoojinta iskuxirrada waxsoosaar ee degaanka waqtiga ayuu is la beddelayaa, iyada oo ay ugu wacayihiin shan sabaood oo xiriir leh. Tan hore waa culayska sababaha horumar ee macaamiishu doonayso. Waxaa halkaa soo gala waxyaalo kala duwan oo laga rabo oo ay ka mid yihiin qiimaha, tayada iyo adeeg la isku hallayn karo. Sababahaas guusha waxsoosaar lagamamaarmaanka u ahna waxay ku kala duwanyihiin hadba waxsoosaarka soo baxa. Tan labaad waa waqtiga, waxsoosarka suuqu hago waa uun hawl caadi ahaan waqtiga la socota, shirakadaha waawayn ee soosaara badeecooyinka muhiimka ah iyo qandaraaslayaashuna waxay qiimeeyaan kharashka ugu habboon waxayna yeeshaan awoodo ay si qumman wax u

la soo wareegaan ama ku sii iibin karaan. Tan saddexaad ee sii xoojinta ku lug leh waa inta waxsoosaarku le'egyahay. Inta uu le'egayahay hawlgalka soosaariddu ayay iyana le'kaanaysaa fursadda ay qandaraaslayaashu awood u leeyihiin in ay gaaraan heerka maalgashi ee waxsoosaar heer sugan ah ku gaari karaan. Tan afaraad waa murugsanaanta heerarka waxsoosaar. Haddii murugsanaantaasi sii badataba waxaa yaraada awoodda ay qandaraaslayaashu kaga falcelin karaan muddo gaaban-dhexe. Ugu dambaynta, awoodda ay qandaraaslayaasha degaanku kaga falcelin karaan baahiyaha iibsadeyaashu waxay ku xirantahay inta ay le'egtahay firfircoonaanta hawlgalladoodu. Waxa loo yaqaan "global competitiveness" xad sugan ma leh, arrinta qandaraaslayaasha degaanka culayska saartaana waa in ay la qabsadaan xawlliga hawlgalladu ku socdaan oo kordhiyaan horumarinta waxsoosaakooda.

5. DOORKA DAWLADDA IYO QORSHAHA SIYAASADEED EE GUDAHA

Awoodda fulineed ee dawladda ay beddelid qorshe siyaasadeed ku yeelan karto waxay door wayn ka ciyaartaa ogaanshaha jihada ay hawlahaasi u socdaan. Dawladuhu badanaa way soo farageliyaan hawshan iskuxirrada waxsoosaar lagu dhisayo si meesha u sarraysa loo gaarsiiyo qaabka ay hawlaha qandaraaslayaasha kale ay degaanka noqonayaan. Faragelinta dawladda waxaa dhici karta in ay waxtar yeelato oo noqoto mid isugu jirta sii xoojin iyo dardargelinta iskuxirradaa waxsoosaar (xoodanka jaantusku kor ayuu ugu kacayaa dhanka bidix), ama meelaha qorshaha siyaasadeed uu marinhabowsanyahay fulintuna liidato, in gaabis laga dhigo iskuxirradana waxsoosaar oo la dabciyo (xoodanka jaantusku hoos ayuu aadayaa iyo dhanka midig) (jaantus 2).

Dawladuhu waxay ku xiiseeyaan dardargelinta iskuxirrada dhanka waaxda badeecooyinka muhiimka ah shan sababood oo waawayn. Koowaad, dawladaha badankoodu waxay door bidaan dardargelinta koboc dhaqaale iyo shaqaalayn. Guud ahaan, waaxaha lacagta adag iyo badeecoyinka muhiimka oo lagu yaqaan in ay maalgashi culus oo dhanka teknoolojiyada waxsoosaarka u baahanyihiin waxaa kooban shaqaalaynta laga filan karo iskuxirka u dhexeeya soosaaraha iyo qandaraaslaha ka hoos shaqeeya. Tani se ma khusayso, sida guud ahaan lagu yaqaan, badeecooyinka nugul ee iskuxirkaasi uu khuseeyo iyo sii hagaajinta badeecooyinkaa oo markaa u baahan shaqaale badan. Marka la is barbar dhigo, iskuxirrada loo yaqaan *backward inkages* ee u kala dabqaada dhammaan saddexda nooc ee badeecooyinka muhiimkaa ah guud ahaan sida lagu yaqaan shaqaale badan ayay u baahanyihiin, gaar ahaan heerarkooda hore ee soosaaridda degaanka ah. Sidaa awgeed, waxay dawladuhu u door bidaan in ay yihiin iskudhaf dhaqaale oo soo jiidasho leh. Labada nooc ee iskuxirrada ah (forward iyo backward) waxay kale oo kor u qaadaan heerka GDP dal leeyahay, in kasta oo meelaha faa'iidada ay soosaarayaasha iyo adeegsadeyaashu ay dhamaamteed ku tiirsantahay faragelin culus iyo taageero dawladdu la gaadho uu kororkani iska magacuyaal uun yahay e aanu dhab ahaan sii buurnayn.

Nooca labaad wuxuu fursad wayn u abuuraa iskudhafka dhaqaale ee dal. Horumarinta iskuxirradu waxay keentaa yool si uun loo higsado, si loo gaaro horumarin tayo leh oo ay yeeshaan waaxaha warshadaynta iyo adeegyadu. Se in taxnaanta iskuxir laga soo raadguro dhanka waaxda badeecooynika muhiimka macnaheedu mar walba ma aha in tilmaamay horumar uu gaaray dhaqaale firfircoon oo tayaysan.

Tan saddexaad oo la xiriirta yool higsashada waxay khusaysaa iskudhafka ilaa heer awoodeed oo waqtiga la socoshadiisa ku tabaraysta. Iyada oo ay dhici karto in dawladuhu ogyihiin in muddada gaaban aanay jirin wax horusocod ah oo laga gaari karo horumarinta iskuxirro tayo leh ayay haddana ku saxannaan karaan rumaysnaanta in caqabaddaa la xallin karo ama ugu yaraan la yareeyo muddo ka dib. Sidaa ayay dardar ku gelin karaan in ay abbaaraan iskuxirrada oo ay siyaasaddooda waxsoosaarka warshadeed ku xoojinayaan, iyada oo la malaynayo horumarinta qorshe kaabaya hababka waxsoosaar ee qarameed in uu mustaqbalka keeni karo dhaqaale iksudhaf ah oo tayo leh. Tani waa qorshaha siyaasadeed ee Botswana ay si qayaxan u qaadatay si loo horumariyo iskuxirrada dhaqaale ee ka kala fula waaxda soosaaridda khayraadka dheemanka.

Tan afaraad, iskuxirrada ka fula waaxda badeecooyinka muhiimka ah waxay abuuri karaan dhaqaalayow dibadeed, waa tii aan hore u soo xusnay tusaasilihii Koofur Afrika ee ku saabsanaa waxsoosaarka ku dhisan teknoolojiyada injineerinta hydraulic-ga. Tusaalahaa se waa kuwa laga soo qaato dhanka aqoonta sare u baahan ee iskuxirrada. Dalka Angola oo gaar ahaan lagu yaqaan waxsoosaar teknoolijiyo bireed oo tabar daran, dardargelinta waaxda soosaaridda aasaasiga ah ee biraha looga baahanyahay warshadaha iyo iskukabida xarkaha gunta iyo dusha badda isaga gudba ayaa kaalmaynaya abuuridda dalabaad xagga farsamooyinka biraha oo saamayn wayn ku leh qaybaha kale ee warshadaha iyo waaxaha dhismaha iyo kaabayaasha isgaarsiinta. Dalka Nigeria, xirfadaha IT ee loo abuuray in ay u adeegaan baahiyaha soosaaridda saliidda ceeriin ayaa sidaa oo kale waxaa loo adeegsadaa waaxaha waxsoosaar ee kale. Dhan kale oo uu ay ka abuurmi karaan dhaqaaalayoga dibadeed iskuxirrda waaxaha ka dhexeeya ama waax qura ka dhex jira ee ka dhasaha hroumarinta kaabayaasha isgaarsiinta si loo daboolo baahiyaha waaxda badeecooyinka muhiimka ah. Tusaale ahaan, horumarinta waddooyinka Central Corridor ee isku xira xeebaha Tanzania iyo carriga gudaha ah, dabadeedna Rwanda iyo DRC ayaa tusaale u ah sida iskuxirrada lagu farsameeyay waaxda qodida macdanuhu ay ugu gudbi karaan qaab fursado u abuura waaxaha beeraha, qodidda macdanaha iyo kuwo kaleba.

Tan shanaad, faragelinta dawladeed ee lagu kobcinayo horumarinta iskuxirradu waxay kale oo ka timaaddaa shirkadaha waawayn ee badeecooyinka muhiimka ah soo saara oo ku guuldarraysta in ay qorshedejin habboon ku hawlgalaan dabadeedna ay fuliyaan horumarinta qandaraaslayaasha la shaqeeya. Badanaa waxay ku guuldarraystaan arrinta “i tus oo i taabsii” waana sidaana waxa aan loo helayn tusaalayaal badan oo shirkado MNC ah oo si qumman u baxnaaniya u na soo saara qandaraaslayaal degaanka ah, in kasta oo badankoodu sheegtaan in taasi ay yoolkooda ugu wayn tahay. Haddaba maxay sidaasi ku dhacdaa iyada oo hrumarinta qandaraaslayaasha deegaanka ku jirto fursado faa’iido u keeni kara shirkadahaa waawayn ee badeecooyinka muhiimka ah soo saara, kuwo badan oo qodidda macdanaha ka shaqeeyaana ay ku hawllanyihiin in ay dhiirrigeliyaan oo taageeraan horumarka waxsoosaarka degaanka? Jawaabta qayb ka mid ah waxay la xiriidhaa qaabfikirka shirakadeed iyo caadooyinka ka dhasha hirgelinta hawlaheeda. Xataa waaxda waxsoosaarka warshadaha oo iskuxirka qandaraaslayaasha hoose iyo soosaaraha kore uu ugu horumarsanyahay, marka laga reebo dhawr shirkado Jabbaan ah oo

waawayn iyo dhawr Maraykan iyo Yurub ah oo suuqa ku la tartama, horumarinta qandaraaslayaasha hoose guud ahaan waa han uun e dhab ahaan u ma muuqdo. Waaxda badeecooyinka muhiimka ah iyadu waa ku cusubtahay ka qaybqaadashada horumarinta noocan ah, taa oo sii kordhinaysa dhibaatooyinka ka dhabayn la'aanta arrintan.

Sabab kale oo ka dhalata waxa shirakadaha waawayn ee badeecooyinka muhiimka soo saara u fulin la'yihiin horumarin dhab ah oo ay ka hirgeliyaan waxqabadka qandaraaslayaasha degaanka ee la shaqeeya waa qaabka qandaraasyada la kala saxiixdaa u dhiganyihiin marka maalgelin la la damco dhisidda kawooyin macdanaha laga qodo iyo ceelal shidaal oo cusub.

Xeerka guud waa in shirkadda qodda macdahaha ama tan maamusha ceel shidaal ay dhismaha kaawada macdanta laga qodo ama ceel shidaal qandaraas ku sii siiyaan shirkadaha ku takhasustay dhismaha ama rakibidda. Qandaraaslayaashaasi waxay ka hawlgalaan heer caalami waxayna xiriir muddo soo jiray la leeyihiin qandaraaslayaal hoose oo iyaga ruuxooda la shaqeeya. Taa waxaa ka sii mudan, shirkadaha ku lug leh dhismuhu ma maamulaan kaawooyinka macdahana qoda. Sidaa awgeed ayaa habka tayada kor loogu qaadaa shirkadaha dhisa kaawooyinka macdanaha laga qodo ama ceelasha saliidda ee aan u qalabaysnayn qandaraas siinta joogtada ah ee kaabayaasha degaanka. Tusaale ahaan, dalka Tanzania, shirkadda u xilsaarnayn mid ka mid ah kaawooyinka cusub ee dahabka laga qodo waxa saldhiggeedu ahaa dalka Australia. Heerka farsao ee ay u adeegsanaysay gelinta dhuumo caag ah iyo korontadu wuxuu ku salaysnaa tayada Australia, intii kan Tanzania lagu salayn lahaa, sidaa lagaga quustay qandaraasle labaad oo degaanku ka helo dhismaha kaawaada macdanta laga qodo. Sabab labaad oo shirkadaha soo saara badeecooyinka muhiimka ah ayan si qumman u adeegsan qandaraaslayaasha degaanka waa marka gaar ahaan kaawada macdanuhu ama ceelku ay carri shisheeye, go'doon ah oo badanaa xaaladda noloshu adagtahay ku yaallaan. Taa waxay keentaa in shaqaalaha maamula iskuxirka heerarka waxsoosaar iyo waaxda soo iibsashadu oo caado u leh in ay shaqeeyaan muddooyin kooban oo shaqadu aad u badantahay, badanaa lix toddobaad oo shaqo ah iyo lix toddobaad oo fasax ah. Taa marka lagu sii daro aqoon la'aantooda afka dalkaa looga hadlo, joogitaankooda gaaban ayaa ka hor imanaya in ay xiriir qoto dheer la yeeshaan qandaraaslayaasha degaanka oo badanaa lagamamaarmaan u ah ballaarinta shaqaalaynta degaanka u na horseedi hara mashruucyada horuminta iskuxirka waxsoosaar hirgelin guuleysata.

Marka dhanka siyaasadd dejinta dawladda laga eego, waa suuragal in la asteeyo dhawr siyaabood oo lagu gaaro siyaasad dejin mirodhal ah (jaantus 3). Tan hore waa waxa loo yaqaan laaca dhow ("low hanging fruit") oo ah fursado iskuxir oo degaanka qiime ka jaban kii dibedda lagaga soo dejin lahaa lagaga heli karo. Kuwaa faa'iido muddo gaaban ah ayaa uga soo laabata shirkadaha waawayn ee badeecooyinka muhiimka ah soo saara, qandaraaslayaashooda iyo macaamiishoodaba. Tan labaad waxay ku jeeddaa soosaarayaasha degaanka ah ee tabartooda hawlgal bilow ilaa heer sare tahay se u baahan waqti iyo taageero, si ay u gaaraan heer ay awooddooda kor ugu qaadaan oo ugu hirtaan heer caalami. Ugu dambaynta, waxaa jira iskuxirro aad loogu hanwaynyahay badanaana heer sare oo aan la hollin karin jooga. Waxay qaadanaysaa muddo dheer, haddiiba la karo, inta soosaarayaasha degaanku ay soo saari karaan waxsoosaar tayo leh oo la qabsan kara heerarkaa. Halkan khatartu waxay

ka iman kartaa hawlgallo macaashdoon ah oo ay ku kacaan dad ay dano ugu jiraan inay dejiyaan siyaasado aan laga yoolgaari karin oo ay ka taajiraan. Siyaasad dejintu halkan waa in ay ku jeeddaa sidii loo xayiri lahaa culayska siyaasadeed ee ka soo fulaya dad deegaanka ah oo doonaya in ay meelmariyaan iskuxirrada laga badbadshay ee aan suuragalka ahayn. Saddexdaa nooc waxay la falgalaan hadba qaabka halwgal ee jira. Midkee ayaa ka mid ah iyo noocyadee waxay ku xirantahay qaabka waaxda dhaqaale ee laga hadlayo (tusaale ahaan, waxsoosaarka beeraha ayay kaga sahlanyihiin shidaalka badda gunteeda hoose laga qodo), awoodda dalku u leeyahay (iskuxirradu Koofur Aafrika ayay kaga qoto dheeryihiin kagana ballaaranyihiin Tanzania), isbeddelka teknolojiyadeed (xadka tartanka suuqa caalamiga ah wuxuu isu beddelayaa heerar kala duwan), waqti (karaanka waxqabad muddo ayuu qaataa in la kobciyo), iyo doorka lagamamaarmaanka ah ee siyaasad dejinta miradhalka ah.

Jaantus 3: Halbeegga waxsoosaarka degaanka



Sidaa awgeed, haddii horumarinta iskuxirrada la xoojinayo, dawladaha iyo shirkaduhu waxay u baahanyihiin in ay la yimaadaan qorshe ku aaddan horumarintooda. Arrinta lafdhabarka u ah astaamaha siyaasad dejin guulaysata iyo hirgelinteedu waa tan qorshaha istirijaayadaysan. Arrintani waa waxa ugu horreeya ee laga doonayo ka miradhalinta iyo korinta qorshe hirgelin iskuxir waxsoosaar oo baaha. Arrinta qorshaha istiraatijayeed ee saamaynta ku leh siyaasadaha ku aaddan waaxda khayraadka ruuxeeda iyo siyaasadaha kale (sida kuwa horumarinta kaabayaasha isgaarsiinta iyo kobcinta xirfadaha) ee saamaynta dadban ku leh horumarinta iskuxirrada waxaa hoggaamiya baahida loo qabo in inta dantu ugu jirto ay ulajeedkooda ku dhereriyaan faa'iidada mugga leh ee iskuxirrada laba kolba guusha jooga (win-win).

Afeef muhiim ah oo habkan horumarineed ku lammaan, gaar ahaan marka dawladdu soo farageliso si ay u dedejiso u na qotodheerayso horumarinta iskuxirrada ayaa ah in qaar ka mid waxyaabaha ka dhasha ay dhici karto in aanay "economically optimal" noqon. Taa macnaheedu waa in siyaasadda loo dejiyay in lagu kordhiyo awoodda waxsoosaar degaanka ee la xiriidha "backward linkages" ama la dhiirigeliyo "forward linkages" ay aad qaali u noqon karto hirgelintoodu, iyada oo waafi la'aan ka jirtaa iskuxirrada ay liqi karto faa'iidooyinka waaxda badeecooyinka muhiimka ah ka soo xerooda qaarkood. Sidaa si la mid ah, meelaha siyaasadda dawladdu ay dib u dhigto horumarinta iskuxirrada si dabiici ah uga dhex abuurmi lahaa suuqa xorta ah waxaa is la mar ahaantaa ku jiri kara fursado doorasho oo la xiriira dhiirrigelin la'aanta iskuxirrada waxsoosaar. Sidaa hadii ay dhacdo, waxa lumayaa waa faa'iidooyinka horraanta halka horumarinta iskuxirrada dhakhsaha ah ay abuuri lahaayeen dakhli degaanka soo gala, taageeri lahaayeen horumarinta kartida degaanka, kharaska ku

baxa sarrifka qalaadna baajin lahaayeen. Waa ay adagtahay in horraanta lagu doodo (*a prioiri)* in goddoloolooyinka muddada dhow ay yihiin hab iskii u suuragal ah oo lagu dhiso kartida waxsoosaar cuddoon ee muddada fog, maadaama tan ay ku kala duwanaan waqtiga la jaanqaadda ku tahay waaxaha waxsoosaar iyo dalalka. Sidaa awgeed, waa mid tixgelin wayn ku leh golaha siyaasad dejinta ku aaddan kordhinta baahsanaanta iyo qotodheerida iskuxirrada waaxda waxsoosaarka badeecooyinka muhiimka ah.

6. GABAGABO

Gabagabada, caqabadaha soo kordhaya ee hor taagan horseedayaashii caadada u ahaan jiray warshadayntu, la soo degidda oo waxsoosaar gufaha loo rogo iyo warshsadayn wax dhoofin yoolkeedu yahay, ayaa ka dhigaya in dhammaan dhaqaalayowgu, siiba kuwa badeecooyinka muhiimka-dhoofinta ku shaqeeya, ay dejistaan qorshe istiraatiijiaydeed oo ay ku dhiirrigeliyaan waxsoosaarradooda warshadaysan. Sidii aan hore u soo aragnay, waxaa jira fursado cusub oo u furan dalalka dhoofiya badeecooyinka muhiimka ah ee dakhligoodu hooseeyo, taa oo ka dhalanaysa suuqa badeecooyinka muhiimka ah oo xilli barwaaqo sii soconaysa ama dabadheeraan karta ku jira iyo heer ay shirakadaha gabnacsigu ka gaareen dejinta istaraatijiyado ku aaddan in heerka ugu sarreeya la gaarsiiyo erginta dibadeed ee waxsoosaarka aan takhasuskooda hoose ahayn. Haddii taa si qumman loo fuliyo, waxay keeni kartaa fursad ay ku abuurto iskudhaf dhaqaale, iyada oo sii xoojinaysa iskuxirrada waxsoosaarka gudaha iyo gaar ahaan kan dibadeed (backward-forward). Se waa waddo istiraatijayeed oo ay daadsaniyihiin qodxihii iskudayo hore oo guuldarraystay, kuwaa oo ay majaxaabiyeen iyada oo ay isugu tageen taageerada siyaasad dejin aan habboonayn oo liidata iyo han taagti ka waynaaday oo laga qabay awoodda dhaqaale ee lagu horumarinayo fursadaha faa'iido dhalinta ee waxsoosaar.

Sidaa awgeed, falcelinaha siyaasadeed waa in ay noqdaan kuwo ku salaysan caddayn la hayo ayna ahaadaan istiraatiiji la jaanqaada yoolka ganacsi iyo fulinta qorshayaasha oo lagu kaabaa farsamooyin siyaasadeed oo abaalmarinno iyo ciqaabo ku habboon laga filan karo. Intaa waxaa u dheer, halkanna in cashar laga barto ay tahay, khibaradda horumarineed ee Shiinaha waayadan dhawaa soo martay. Ma jiro hal qorshe oo waddammada oo dhan u shaqayn karaa, siyaasad dejintana waxaa loo baahantahay in dhab ka hadal hadba dhan loo loodin karo ay tahay. Xaaladda markaa taagan iyo qaabkeedaa in laga duulaa waa muhiim, maadaama ay kala duwanaan wayni ka jirto saddexda kooxood ee badeecooyinka muhiimka ah oo kala ah tan dabacsan, tan adag iyo tan tamarta iyo sidaa oo kale kala duwanaan ka sii dhex jirta isla mid ka mid ah saddexdaa. Waxaa u weheliya, dal walba dhaqaalihiisu waa nooc gooni ah, wuxuuna maraa waaya'aragnimo waqtiga la socota oo awoodaheeda iyo siyaasaddeeda dhaqaale wadata. Waxaa kale oo caddayn caalami ah laga dheehan karaa in siyaasad dejin waxtar ah ay atahy hawlgal isa soo tara oo joogto ah ee aanay ahayn uun qodobbo dukumiinti ku qoran iyo in uu ka mid yahay xiriir soke oo dhexmara hantiilayasha guud iyo kuwa gaarka ah ee dantu ugu jirto, mararka qaarna bulshada rayidka ah.

Malaha casharka ugu muhiimsan ee laga baran karo abuuridda istiraatiijiyooyinka erginta dibadeed ee waxsoosaarka ee ay shirakadaha waawayn u adeegsadaan

iskuxirrada caalamiga ah waa iyada oo fikradda ku dhisan go'doominta waxsoosaar ee dalalka dakhligooda dhaqaale hooseeyo ay waagan la joogo u adeegsanayaa iskudhafid waxsoosaar in aanay ahayn mid joogto ahaan jirtay. Waxaa jirta in wadashaqayn baahsan oo ka dhexaysa shirakadaha waawayn ee badeecooyinka muhiimka ah soo saara iyo kuwa leh fursadaha horumarinta iskuxirrada waaxda badeecooyinka muhiimka ah si ay u astaystaan heerka fursadda laba kolba faa'iido joogta (win-win), si ay u dhiirrigeliyaan iskudhaf waxsoosaar. Arriamaha ka dhasha isaaminid la'aanta dalal badan ka dhexaysa, shirkadaha oo aan tixgelin fikradaha kuwooda ka duwan iyo siyaasad dejinta taariikh ahaan aan habboonayn miradhalna ahayn ayaa waxaa dhici karta in ay waayadii hore liidi jireen iskuxirrada waxsoosaar. Se, isla mar ahaantaa, arrimahaasi waxay ka tarjumayaan fursad qaali ah oo mustaqbalka timaadda.

Copyright © 2015
The International Bank for Reconstruction and Development/The World Bank
1818 H Street, NW
Washington, DC 20433
Telephone: 202-473-1000
Internet: www.worldbank.org

Warqadaqooneedyada Bangiga Adduunka (World Bank) waxaa loo daabacaa in sida ugu dhakhsaha badan loogu gudbiyo waxa ka soo baxa shaqada Bangigu u hayo hay'adaha horumarinta ku hawllan. Sidaa awgeed, qoraalka warqadaqooneeddan loo ma diyaarin hab waafaqsan qaab ku habboon kuwa sida muuga leh loo tifatiro. Ilaha xigasho ee warqaddan lagu xusay qaarkood waxaa dhici karta in aanay ahayn kuwo si qumman u soo baxay ama aan si fudud loo heli karin. Warqaddan waxaa soo saaray shaqaalaha ama lataliyeyaasha Bangiga Caalamiga ah ee Dibudhiska iyo Horumarinta / Bangiga Adduunka. Waxayaalaha lagu soo saaray, sharraxaadaha ku qoran, iyo qeexidaha warqaddan ku qoran ma aha in ay ka tarjumayaan aragtiyaha Maareeyeyaasha Guud ee Bangiga Adduunka ama dawladaha ay matalaan. Dhammaantood waxaa iska leh qorayaasha, waana in aan sina loogu qaadan kuwo ka soo fulay Bangiga Adduunka, ama hay'adaha la jaalka ah, ama xubanaha guddiigooda maaraynta iyo dalalka ay matalaan.

Bangiga Adduunku ma dammaanadqaadayo dhab ahaanta wacaalka halkan ku qoran, wax xil ahna ka qaadi mayo wixii ka yimaada iyo sida loo adeegsado, sida ay doonaan ha ahaadaan e. Xudduudaha, midabbada, cabbirrada, ama wacaalka kale ee ka muuqda khariidad walba oo halkan ku taal ka ma dhigna fikrad Kooxda Bangiga Adduunku ka qabaan sharcinimo aqoonsi ama daleed ama aqoonsi xudduudahaa midna.

Xuquuqda Hantimaanka iyo Fasaxaqaadashada

Wacaalka ku qoran warqaddan xuquuqdiisa hantimaanku waa dhawrantahay. Dheegasho iyo / ama sii gudbin qaybo ka mid ama dhammaan qoraalkan iyada oo aan fasax loo helin waxay noqon kartaa ku xadgudub sharci jira oo la isku qaadi karo. Bandgiga Caalimiga ah ee Dibudhiska iyo Horumarinta / Bangiga Adduunka wuxuu dhiirrigelinayaa baahinta qoraalladiisa aqooneed, sida caadada ahna fasax dhakhso leh ayuu ku bixiyaa in dib loo daabacdo qaybo ka mid ah.

Wardoonnada ku saabsan xuquuqda qoraalkan iyo shatiyada oggolaansho baahin, oo ay ku jiraan kuwa sii gudbintu, waa in lagu soo hagaajiyaa cinwaankan:

Office of the Publisher, The World Bank, 1818 H Street NW, Washington, DC 20433, USA; fax: 202-522-2422; e-mail: pubrights@worldbank.org.